Government of Western Australia
Department of Health
Public and Aboriginal Health Division

# Barnaamijka tallaalka dugsiga ee Sannadka 10 aad – macluumaadka loogu talagalay waalidiinta

## Maxuu yahay cudurku meningococcal?

Cudurka meningococcal waa mid dhif ah, laakiin mararka qaarkood waa jirro nafta halis gelisa. Cudurku waxaa sababa caabuqa bakteeriyada ku jira dhiiga iyo/ama xuubabka ku dahaaran laf dhabarta iyo maskaxda.

In kasta oo lagu daawayn karo antibiyootiga, infekshanku si degdeg ah ayuu u horumari karaa, sidaa awgeed waa muhiim in qof kasta oo isku arka astaamaha cudurka meningococcal uu si degdeg ah u raadsado daryeel caafimaad.

Hal mar, qiyaastii 10 boqolkiiba dadka caafimaadka qaba waxay si dhib la'aan ah bakteeriyada meningococcal ugu qaadaan sankooda ama cunahooda, mana u jiradaan.

## Sidee ayuu cudurka meningococcal u faafaa?

Bakteeriyada Meningococcal waxay ku faaftaa dheecaanka ka imaada neefsashada (qufac, hindhiso ama dhunkasho). Bakteeriyadu kuma noolaato deegaanka wax ka badan dhowr ilbiriqsi.

Cudurku wuxuu u badan yahay inuu ku faafo oo keliya xidhiidhka aadka isugu dhow, sida dadka ku nool hal guri, xiriir galmo iyo carruurta wada joogo hal goob oo xannaano maalmeed ah in ka badan afar saacadood oo xiriir ah.

## Waa maxay sababta ay WA Health ay u bixiso barnaamijka tallaalka ardayda ku jirta Sanadka 10-aad?

Cudurka meningococcal wuxuu saameyn karaa koox kasta oo da' kasta leh. Si kastaba ha ahaatee, qaar ka mid ah heerarka ugu sarreeya ee qaadista iyo u jirashada cudurka meningococcal ayaa ka dhex dhaca dhalinyarada iyadoo kooxda da'daan ay u gudbin karaan bakteeriyada dadka khatarta sii korodha ugu jira infekshinka, oo ay ku jiraan carruurta yaryar.

Waxa la filayaa in talaalka ardayda fasalka 10-aad ay yarayn doonto u gudbinta bakteeriyada dadka kale oo ayna gacan ka gaysato ka hortagga caabuqyada ka dhex jira bulsha weynta.

## Tallaalkee ayaa la isticmaali doonaa sidee ayuuse waxtar u leeyahay?

Waxaa la isticmaali doonaa Meningococcal ACWY. Tallaalkani waxa uu dadka ka difaacaa afar serogroups oo bakteeriyada meningococcal ah: A, C, W iyo Y. Magaca tallaalka Nimenrix® ayaa loo isticmaali doonaa barnaamijkan dugsiga ku saleysan.

Tallaaladani waa kuwo badbaado iyo waxtar leh. Barnaamijyada tallaalka Meningococcal ACWY waxaa laga hirgaliyay da'yarta 13 ilaa15 sano gudaha UK tan iyo 2015 iyo dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 11 ilaa12 gudaha Maraykanka tan iyo 2005 iyada oo aan wax walaac ah laga soo sheegin. Tallaalku waxaa si caadi ah loo siiyaa dadka hal qiyaas. Qiyaaso dheeraad ah ayaa lagula talinayaa inay qaataan kuwa halista ugu jira cudurkan iyo kuwa u safraya meelaha cudurkani ku badan yahay. Daraasaduhu waxay muujiyeen waxtarka tallaalada meningococcal ACWY u leeyahay dhalinyarada inuu yahay inta u dhaxaysa 80-85 boqolkiiba.

## Yaa waaye cida ay tahay inaysan qaadanin tallaalkan?

U sheeg qofka tallaalka bixinaya haddii:

- **aad qabtid xasaasiyado daran oo nolasha halis galin karta**

  Haddii aad ku qabto falcelin xasaasiyado nafta halis gelisa qiyaasta tallaalka meningococcal ACWY ee aad horey u qaadatay, ama haddii aad xasaasiyad daran ku qabtid qayb ka mid ah tallaalkan, waa inaadan qaadan tallaalkan. Qofka tallaalka ku siinaya ayaa kuu sheegi kara waxa ay ka sameeysan tahay tallaalkan.

- **aad uur leedahay ama aad ilmo naas nuujinayso.**

  Tallaalka meningococcal si joogto ah looguma taliyo inay qaataan haweenka uurka leh ama naas nuujinaya laakiin waa la siin karaa haddii ay talo caafimaad tahay. Fadlan si dheeraad ah ugala sii hadal GP-gaaga haddii aad uur yeelan karto ama aad naas nuujinayso.

## Maxay yihiin waxyeelooyinka tallaalka?

Daawo kasta, oo ay ku jiraan tallaalada, waxaa jira fursad falcelin xun ay caadiyan yeelan karto. Kuwaani badanaa waa kuwa fudud oo keligood ayaa iska baaba'a. Xasaasiyad halis ah ayaa sidoo kale suurtagal ah, laakiin waa dhif. Waxa jirta fursad aad u yar in talaalku uu keeni karo dhaawac ama dhimasho halis ah. Kama qaadi kartid caabuqa meningococcal tallaalka.

Dhacdooyinka caadiyan natiijooyinka aan fiicnayn leh waxaa ka mid ah meeshii lagaa duray oo ku xanuunta, casaan ku noqota isla markaasna ku bararta, qandho, xanaaq, lulmo, rabitaanka cuntada oo yaraada, madax-xanuun, finan iyo lallabo. Si kastaba ha ahaatee, dhacdooyinka leh natiijooyinka guud ahaan aan fiicnayn waa naadir.

Tallaallada had iyo jeer waa la hubiyaa si loo xaqiijiyo inay yihiin kuwo badqab iyo waxtar leh. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan badqabka tallaalka iyo waxyeellooyinka caadiga ah iyo kuwa dhifka ah, fadlan wax badan ka akhri barta: healthywa.wa.gov/immunisation

## Maxaa dhacaya haddii ay jirto falcelin halis ah – waa maxay waxa ay tahay inaan la socdaa?

Raadi wax kasta oo adiga ku khuseeya, sida calaamadaha falcelin xasaasiyad daran, qandho aad u sareysa, ama habdhaqano aan horey aan horey layskugu arkin. Calaamadaha falcelinta xasaasiyadda daran waxaa ka mid noqon kara furuuruc, wejiga iyo cunaha oo ku barara, neefsashada oo kugu adkaata, wadnaha oo aad kuu garaacma, dawakhaad, iyo daciifnimo – badiyaa dhowr daqiiqo ilaa dhowr saacadood gudahooda markay kasoo wareegtay xilligi tallaalka la qaatay. Falcelin kasta oo daran, wac ambalaas ama u tag qaybta gargaarka degdegga ah ee kuugu dhow.

## Maxaan sameeyaa?

Paracetamol ayaa kaa caawin kara yaraynta qandhada fudud ama xanuunka iyo maro qoyan oo qabow ayaa sidoo kale ka yareyn karta xanuunka goobta la duray. Fadlan raadso la-talin caafimaad ama u tag waaxda xaaladaha degdegga ah ee deegaanka haddii aad isku aragto falcelin aad u malaynayso inay halis tahay ama lama filaan ah.

Ama ka wac ***healthdirect Australia*** lambarka 1800 022 222.

Dhammaan bixiyeyaasha tallaalka ee WA waxuu sharciga uga baahan yahay inay soo sheegaan falcelinta xun ee ka dhalata tallaalka. Waalidiintu sidoo kale waxay soo sheegi karaan welwelka ku saabsan falcelin kasta oo halis ah ee ka dhalata tallaalka. Waxbadan ka ogoow barta healthywa.wa.gov.au/WAVSS ama wac 6456 0208.

## Macluumaad dheeraad ah

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid tallaallada meningococcal, kala xiriir ***healthdirect Australia*** 1800 022 222 ama kuwa tallaalka ka bixiya degaankaaga adigoo isticmaalaya faahfaahinada meelaha laga xidhiidhayo ee ku qoran dhabarka baqshadda oo ay ku jirto warqadaada oggolaanshaha.

HealthyWA
healthywa.wa.gov.au

Dukumeentigan waxaa lagu heli karaa qaabab kale haddii uu codsado qof naafa ah.

Waxaa soo saaray Communicable Disease Control Directorate
(Agaasinka Xakamaynta Cudurada la Isqaadsiiyo)
© Department of Health 2023

Xuquuqda daabacaadda agabkan waxaa leh State of Western Australia ilaa si kale loo tilmaamo mooyee. Marka laga reebo sida cadaalaha ah ee leh ujeedooyinka daraasad gaar ah, cilmi-baaris, dhaleeceyn ama dib-u-eegis, sida lagu oggol yahay qodobbada *Sharciga Xuquuqda daabacaadda 1968*, lama oggola in qayb dib loo daabaco ama dib loogu isticmaalo ujeeddooyin kasta, iyada oo aan oggolaansho qoran laga helin State of Western Australia.

IMM-013356 JAN'23